# Qorshaha Title VI
# Maamulka Gaadiidka Dadweynaha ee Dawlada dhexe
# Iyo Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington

**Luuliyo 1, 2023 ilaa Juun 30, 2025**

# Jadwalka Tusmada

I. Hordhaca ........ 3
II. Habraacyada Cabashada Title VI ........ 3
III. Diiwaanka Title VI ama Xaquuqaha Kale ee Rayidka, Baaritaanada, Cabashooyinka ama Dacwadaha ........ 5
IV. Qorshaha Aqoonta Kooban ee Ingiriiska (LEP) ........ 5
V. Qorshaha Hirgelinta ........ 7
VI. Ogeysiinta Ka faa'ideystayaasha Xaquuqahooda sida waafaqsan Title VI ........ 8
VII. Falanqeynta Mashaariicda Dhismaha ........ 8
VIII. Ka qeybqaadashada Dadweynaha ee Loo dhanyahay ........ 8
LIFAAQA A: Ogaysiinta Dadweynaha ee Title VI ee Hopelink ........ 9
LIFAAQA B: Hopelink Title VI, ADA, iyo Foomka Cabashada Guud ........ 11
LIFAAQA C: Qorshaha Ka qeybqaadashada Dadweynaha Hopelink ........ 13
LIFAAQA D: Kala Qeybinta Isirka ee Gudiga Hopelink ........ 19

## Hordhaca

Title VI ee Xeerka Xaquuqaha Rayidka 1964 ayaa mamnuuco takoorida ku saleysan isirka, midibka iyo wadanka u dhalashada ee barnaamijyada iyo howlaha laga helayo caawinta dhaqaalaha Dawlada Dhexe.

Hopelink waxaa ka go'an hubinta in qofna aan laga reebin ka qeybqaadashada ama diidmada dheefaha adeegyadooda gaadiidka sida ku saleysan isika, midibka, ama wadanka u dhalashada, sida ku ilaalsan Title VI ee Wareegtada Maamulka Gaadiidka ee Dawlada Dhexe (Federal Transit Administration, FTA) ee 4702.1.A

### Habraacyada Cabashada Title VI

Hopelink waxaa ka go'an hubinta in qofna aan laga reebin ka qeybqaadashada ama loo diidin dheefaha adeegyadooda gaadiidka sida ku saleysan isirka, midibka, ama wadanka dhalashada, sida ku illaalsan Title VI ee Wareegtada Maamulka Gaadiidka Dadweynaha ee Dawlada Dhexe (Federal Transit Administration, FTA) ee 4702.1.A Haddii aad aaminsantahay in laguugula kacay takoorid sida waafaqsan Title VI, waxaad xareyn kartaa cabasho.

**Sida loo xareeyo Cabashada Title VI**
Waxaad xareyn kartaa cabasho saxiixan, qoraal ah oo illaa boqol iyo sideedan (180) maalmood laga bilaabo taariiqda takoorida lagu eedeeyay. Cabashada waa inay ku jiraan macluumaadka soo socda:

- Magacaaga, ciwaanka boostada, iyo sida laguula soo xiriiro (tusaale ahaan, lambarka talefoonka, ciwaanka iimaylka, iwm.)
- Sidee, goorma, halkee, iyo sababta aad u aaminsantahay in lagu takooray. Ku dar goobta, magacyada, iyo macluumaadka xiriirka ee marqaati walba.
- Macluumaad kale ee aad u aragtid muhiim

Foomka waxaa laga helayaa Hopelink iyo websaytkeena oo laga yaabo inay lagu dhameystiro ujeedkaan (Lifaaqa B). Goobta Websaydka: https://www.hopelink.org/programs/transportation/

**Cabashada ayaa sidoo kale loogu xareyn karaa qoraal ahaan Hopelink ee ciwaanka xiggo:**

Hopelink, Title VI Coordinator
VP of Transportation
8990 154th Avenue Northeast
Redmond, Washington 98052

Ama adiga oo adeegsanaya iimaylka: *TitleVI@hopelink.org*

*FIIRO GAAR AH: Hopelink waxay ku dhiirigalinaysaa dhamaan dadka cabanaya inay cadeeyaan dhamaan boostada lagu soo diray Adeega Boostada Mareykanka (U.S. Postal Service) iyo/ama hubinta in dhammaan*

*waraaqaha qoraalka ah si sahlan loo raadraaci karo. Cabashooyinka asal ahaan lagu gudbiyay fakis, koobi cabashada asalka ah, saxiixan waa in lagu diraa Xiriiriyaha Title VI sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah, laakiin aan ka dambeyn 180 maalmood ee ka bilaabaneyso taariiqda lagu soo eedeeyay takoorida.*

**Hbaynta adeeg macquul ah, iyo adeegyada turjumaada**

*Markii la codsado, Hopelink waxay bixin kartaa xeerkaan iyo foomka faalada hay'ada oo qaabab kale (tusaale ahaan, Farta Dadka Dhagoolka ah, dabaacaada wayn, nooca maqalka) iyo luuqado aan Ingiriisi ahayn.*

*Macaamiisha ku hadlaa luuqad aan ka aheyn Ingiriis, Hopelink waxay isticmaaleysaa adeegyada Language Line si ay u fududeeyaan wacitaanada.*

<u>Maxaa ku dhaco cabashadaada kadib markii loo gudbiyo Hopelink?</u>

Hopelink waxay si toos ah wax uga qabanaysaa cabashooyinkoo dhan ee ku eedeynayo takoorida ku saleysan isirk, midibka, ama wadanka u dhalashada ee adeega ama dheefaha ay bixiyaan Hopelink. Hopelink ayaa sidoo kale siineyso caawin ku haboon cowdayaasha, oo ay ku jiraan dadka naafada ah, ama kuwaasoo ay xadidantahay awoodooda ay ugu xiriiraan Ingiriis. Waxaa dheeraad ah, Hopelink waxay sameyneysaa dadaal walba ee wax looga qabanayo cabashooyinkoo dhan si degdeg ah oo dhameystiran. .

Haddii warbixin dheeraad ah loo baahdo si loo baaro cabashada, Hopelink waxay la soo xiriiraysaa qofka cabanaya. Fadlan ogow in ka jawaabida codsiyada macluumaadka dheeraadka ah, guuldarada cowdaha ee lagu bixinayo warbixinta la codsaday waxay sababi kartaa xiritaanka maamulka ee cabashada.

Markii warbixin ku fillan baaritaanka cabashada laga helo Hopelink, jawaab qoraal ah ayaa la diyaarinayaa sida waafaqsan dib u eegida qareenka hay'ada. Haddii ay ku haboontahay, qareenka Hopelink ayaa laga yaabaa inuu maamul ahaan u xiro cabashada. Xaaladaan, Hopelink waxay ogeysiineysaa cowdaha talaabada sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah.

<u>Sida laguu soo ogaysiinayo natiijada cabashadaada</u>

Hopelink waxay u soo diraysaa jawaab qoraal ah qofka cabanaya oo waxay u sheegeysaa cowdaha xaquuqdooda ee 1) racfaanka todoba maalmood kalenkarka ah gudahiis ee ka helida go'aanka qoran ee ugu dambeeyo Hopelink, iyo/ama 2) ku xareeyo cabasho dibadeed Waaxda Gaadiidka Mareykanka (U.S. Department of Transportation) iyo/ama Maamulka Gaadiidka Dadweynaha ee Dawlada Dhexe (Federal Transit Administration). Dadaal walba waxaa loo sameynayaa in looga jawaabo cabashooyinka Title VI 60 maalmood shaqo gudahood ee helida cabashooyin noocaas ah, haddii aysan ku dhicin.

Koox dib u eegis ah oo ka kooban Agaasimayaasha Gaadiidka Hopelink, Kooxda Hogaaminta Hopelink, iyo ugu yaraan hal xubin oo kale ayaa dib u eegeyso racfaanada macmiilka. Haddii macmiilka uusan ku qanacsaneyn natiijada nidaamka racfaanada, ama sida Hopelink u qabtaan cabashadooda, macmiilka waxaa laga yaabaa inuu xareeyo cabashada mid walboo ururada ah:

| Washington State Department of Transportation Public Transportation Division | Federal Transit Administration Office of Civil Rights | U.S. Department of Justice Civil Rights Division |
|---|---|---|
| Attn: ADA & Title VI Coordinator<br>PO Box 47387<br>Olympia, WA 98504-7387<br>transit@wsdot.wa.gov | Attn: Complaint Team<br>East Building, 5th Floor – TCR<br>1200 New Jersey Avenue, SE<br>Washington, DC 20590<br>FTACivilRights Communications@dot.gov | Attn: Coordination and Review Section - NWB<br>950 Pennsylvania Ave NW Washington, DC 20530-0001 |

**Wargalinta iyo Raadraaca**

Hopelink waxay hayneysaa feelasha cabashada oo muddu ugu badnaan 6 sanno ah ka badan dhammaadka mashruuca iyadoo la raacayo Jadwalka Diiwaanada Guud ee Xafiiska Keydka Gobolka Washington iyo shuruudaha Barnaamijka Deeqaha Isku dhafka ah ee Waaxda Gaadiidka ee Gobalka Washington (Washington State Department of Transportation, WSDOT). Feelasha cabashada Hopelink waxaa ka mid noqonayo:

- Taariiqda Hopelink ay heshay cabashada.
- Soo koobitaanka eedeymaha cabashada.
- Xaalada cabashada.
- Tallooyinka ay qaadeen Hopelink, oo ay ku jiraan, haddii ay quseyso, u gudbinta cabashada baaritaanka Waaxda Gaadiidka ee Gobalka Washington (Washington State Department of Transportation, WSDOT), Maamulka Gaadiidka Dawlada Dhexe (Federal Transit Administration), ama Waaxda Cadaalada Mareykanka (U.S. Department of Justice).

## I. Diiwaanka Title VI ama Xaquuqaha Kale ee Rayidka, Baaritaanada, Cabashooyinka ama Dacwadaha

Ilaa iyo hada, ma jirin baaritaanada Title VI, cabashooyinka ama dacwadaha.

## II. Qorshaha Aqoonta Kooban ee Ingiriiska (LEP)

Hopelink waxaa ka go'an inay jabiso caqabadaha luuqada iyagoo higelinayo heerar iswaafaqsan oo caawinta luuqada oo aagooda adeega.

Tirikoobka.

Maraykanka wuxuu hoy u yahay malaayiin qof asalka dhalashada dadka laga tiro badanyahay kuwaasoo leh Aqoonta Ingiriiska Kooban (Limited English Proficient, LEP). Taasoo ah, in luuqadooda koowaad aysan aheyn Ingiriis, oo kuma hadli karaan, ma aqriyaan, ma qoraan ama ma fahmaan luuqada Ingiriiska ee heerka u ogolaanayo inay si wax ku ool ah u dhaxgalaan helayaasha caawinta dhaqaalaha Dawalada dhexe.

Sababtoo ah kala duwanaanshaha luuqada iyo awood la'aanta ay si waxtar ah ugu hadlaan ama u fahmaan Ingiriiska, dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) waxaa quseyn karo ka reebida barnaamijka ama howlaha, daahitaanada waaya aragnimada ama diidmada adeegyada. Shaqsiyaadkaan waxay xaq u yeelan karaan caawinta luuqada ee quseyso nooc gaar ah ee adeega. Dowlada dhexe iyo kuwa ka helayo caawin dowlada dhexe waa inay qaadaan talaabo macquul ah oo lagu hubinayo in dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) ay helaan helitaan waxtar leh ee barnaamijyada, adeegyada, iyo macluumaad hay'adahaas ay bixiyeen.

Tan waxay uga baahaneysaa hay'adaha inay aasaasaan xalal hal abuur ah oo wax looga qabanayo baahiyaha dadyowgaan abid korayo oo Ingiriiskooda uusan aheyn luuqada koowaad.

Sida waafaqsan Xogta Sahanka Bulshada Mareykanka ee King County ee 2018, Ingiriiska waxaa ku hadlo boqolkiiba 89.5% ee King County.  Mida xigta waxay matashaa boqoleyda ee qoysaska aanan ku fiicneyn Ingiriiska oo luuqad ahaan.

Gudaha King County, 214,094 dad (10.5%) ayaa leh aqoonta Ingiriiska xadidan; taasoo ah, inay ugu hadlaan Ingiriiska ka yar “aad u wanaagsan”. Dadkaas leh aqoonta Ingiriiska xadidan, qiyaastii boqolkiiba 49% ayaa ku hadlo luuqadaha Aasiyaanka iyo Jasiiradaha baasifiga, boqolkiiba 25% ayaa ku hadlo Isbaanish, boqolkiiba 17% waxay ku hadlaan luuqadaha kale ee Indo-European, iyo 9% waxay ku hadlaan luuqado kale.

| **Luuqada** | **% ee Dadka Leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) ee King County** |
|---|---|
| Isbaanish | 27% |
| Shiinays | 15% |
| Fiitnaamiis | 10% |
| Luuqadaha Afrikaanka | 7% |
| Luuqada Korea | 6% |
| Tagalog | 5% |
| Luuqda Ruushka | 4% |

**FALANQEYNTA ARIMAHA**

<u>**Xaqiiqda Lambarka 1:** Tirada ama saamiga dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) ee aaga adeega.</u>

Xukunka Hopelink wuxuu daboolaa dhammaan Gobolka King, kaasoo si weyn ugu hadlo Ingiriis. Dadweynaha badankood oo aan ganacsi sameyno (shaqsiyaadka rabo inay raacaan gaadiidka) ku hadlaan Ingiriis, inkastoo aan sidoo kale ku dadaalno inaan u adeegno xubnaha bulshada ee aan ku hadlin Ingiriis sidoo kale. Dib u eegida Tirikoobka 2021, hoos waa qiyaasaha luuqadaha ugu badan ee looga hadlo King County:

| Luuqada looga Hadlo Guriga | Tirada Guud | Boqolayda |
|---|---|---|
| Waxay ku hadlaan kaliya Ingiriis | 5,213,096 | 69.59% |
| Waxay ku hadlaan Luuqad kale | 626,071 | 30.41% |
| Isbaanish | 28,292 | 10.87% |
| Chinese-Mandarin | 5,747 | 2.21% |
| Fiitnaamiis | 5,183 | 1.99% |
| Soomaali | 3,610 | 1.39% |
| Luuqda Ruushka | 3,028 | 1.16% |
| Chinese-Cantonese | 2,074 | 0.80% |
| Carabi | 1,910 | 0.73% |
| Luuqada Korea | 1,815 | 0.70% |
| Hindi | 1,761 | 0.68% |
| Luuqada Ukrain | 1,776 | 0.68% |

Jadwalka 1:
https://view.officeapps.live.com/op/view.aspx?src=https%3A%2F%2Fofm.wa.gov%2Fsites%2Fdefault%2Ffiles%2Fpublic%2Fdataresearch%2Fpop%2FLEP%2Fofm_pop_limited_english_proficiency_estimates_2021.xlsx&wdOrigin=BROWSELINK

**Xaqiiqda Lambarka 2.** Inta jeer ee dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) ay la soo xiriireen adeega.

Dhamaan xiriirada Hopelink waxaa lagu sameeyaa qof ahaan ama ka qeybgalada taleefonka. Waxaan u adeegnaa dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) maalin walba iyo dhinaca shanteena xarumo ee adeega, xarunta wacitaanka gaadiidka caafimaadka aan xaaladaha degdega aheyn, ama kala duwanaanshaha barnaamijka Mobility Management. Sanadka maaliyadeedka 2024, Hopelink Maamulka Gaadiidka (Mobility Management) waxay adeegyo siisaa 247 macaamiil iyada oo loo marayo jiheynada gaadiidka dadweynaha, kuwaasoo bartilmaameedsada muhaajiriinta iyo qaxooyiyada leh aqoonta Ingiriiska kooban.

**Xaqiiqda Lambarka 3:** Nooca iyo muhiimada adeega ay bixiyaan Hopelink.

Hopelink waxay bixisaa adeegyo muhiim u ah dadweynaha oo loo marayo habeynta isku dhafan ee barnaamijyada u suurtogeliyo qoysaska dhibaatooyinka ku jiro inay u hormaraan isku filnaansho. Barnaamijyada Hopelink waxay diirada saaraan cuntada, guriyeynta, hormarinta qoyska, waxbarashada dadka weyn (oo ay ku jiraan barnaamijyada farbarashada), gaadiidka, iyo caawinta maaliyada degdega ah.

Daahitaanada adeegyada Hopelink sabab la xiriirto caqabadaha luuqada waxay si daran u saameyneysaa macaamiishooda. Tusaale ahaan, gaadiidka caafimaadka aan xaalada degdega aheyn ee Hopelink oo macaamiisha Medicaid waxay siiyaan helitaanka daryeel caafimaad oo aad loogu baahanyahay shaqsiyaad badan oo daqligooda caafimaadka hooseeyo iyo leh Aqoonta Ingiriiska Xadidan.

Dagayaal badan oo King County, awood la'aanta lagu fahmayo ama lagu qorsheynayo nidaamka gaadiidka dadweynaha ayaa caqabad ku noqdo in la helo. Tan ayaa si gaar ah run ugu ah dadyowga nugul iyo kuwa

ku cusub wadankaan, oo ay ku jiraan dadka naafada ah, dadka waayeelka, shaqsiyaadka daqliga hoose, iyo kuwa leh aqoonta Ingiriiska xadidan. Kooxda Mobility Management Hopelink waxay ku bixiyaan waxbarasho iyo barnaamijyo kheyraadka badan oo tababarka safarka King County oo dhan. Barnaamijyada waxay bixiyaan warbixin ku saabsan dooqyada safarka, qorshooyinka safarka, caawinta gaadiidka qof ku qof, iyo tababarka jaalalka la shaqeeyo macaamiisha. Gudaha 2023, 12,345 dad ayaa ku helay kheyraad barnaamijyadaan.

**Xaqiiqda Lambarka 4.** Kheyraadkaloo heli karo helayaasha lacagaha dawlada dhexe si loo hubsado helitaan waxtar leh ee adeega oo dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP).

Hopelink waxay howlgeliyaan shaqaale taageero kala duwanaanshaha macaamiisheena. Waxaan sidoo kale isticmaalnaa Language Line iyo adeegyada turjumaada muuqaalka si aan u daboolno baahiyaha macaamiisheena.

Buug-yarayaasha barnaamijka Gaadiidka Caafimaadka waxaa loo turjumay Raashiyaan iyo Isbaanish. Adeegyada Bulshada waxay ku bixiyaan qoraalada wacyigelinta luuqado badan, sidoo kale sida saxiixa qeybta nooceena cuntada dukaanka. Hopelink ayaa sidoo kale u fasirto foomamka macluumaadka, sahanada iyo foomamka kale sida loogu baahdo. Gudaha Mobility Management, in ka badan $7,000 ayaa lagu isticmaalay adeegyada turjubaanka iyo turjumaada ee FY2024.

## III. Qorshaha Hirgelinta

Hopelink waxay hirgelisay qorshahooda oo waxay dib u eegeysaa sannad walba, oo ay ku jiraan xiriiro walba ee dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP), si ay u go'aamiyaan inta jeer oo xiriirada ah, luuqada la adeegsaday, iyo sida xiriirada loo qaabilay.

Waxaan ku aqoonsanaa dadka leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) aaga adeega inagoo la kaashaneyno ururada bulshada ku saleysan ee u adeego dadyowga leh Aqoonta Kooban ee Ingriisiga (Limited English proficiency, LEP) oo ay ku jiraan hay'adaha dib u dajinta, ururada adeega bulshada, iyo hay'adaha udoodista soo galootiga. Wacitaan ka jawaabayaasha ayaa loo tababaray inay isticmaalaan adeegyada Language Line. Inta badan buug-yarayaasha iyo qoraalada wacyigelinta Mobility Management waxaa loo turjumaada luuqadaha ugu muhiimsan, iyo wargeyskeena elektarooniga wacyigelinta waxaa lagu helayaa Ingiriis iyo Isbaanish. Xeerka Title VI ee Hopelink iyo Foomka Cabashada waxaa laga helayaa websaydkeena. Dhammaan qoraalada daabacaada Mobility Management, ajendayaasha, iyo jaraa'idyada waxay wataan xeerkeena Title VI. Intaas waxaa dheer, shaqaalaha waxaa loo tababaray sida qorshooyinka Title VI ugu shaqeeyo inuu waafaqsanaado codsigooda.

Si aad ugu hogaansantid 49 Xeerka Shuruucda Dawlada Dhexe (Code of Federal Regulations, CFR)21.9(d), Hopelink iyo heleyaasheeda hoose waa inay siiyaan warbixin ka faa'ideystayaasha oo la xiriiro waajibaadyadooda Title VI iyo ogeysiiyo ka faa'ideystayaasha illaalada ka soo horjeedo takoorida oo iyaga ay u awoodaan Title VI. Hopelink waxay sameysay bayaanka xaquuqaha iyo bayaanka xeerka.

## IV. Ogeysiinta Ka faa'ideystayaasha Xaquuqahooda sida waafaqsan Title VI

1. Websaydkeena waxaa ku jiro foomkeena xeerka iyo cabashada Title VI.

2. Xeerkeena Title VI, oo ay ku jiraan sida loo helo ogeysiinta xeerkaan oo afar luuqad oo kale, waxaa laga muujiyaa ajendaha kulankeena isbaheysiga dibada iyo wargeyska elektarooniga ee jaalalka dibada.

## V. Falanqeynta Mashaariicda Dhismaha

In ka badan sadexdii sanno ee la soo dhaafay, Hopelink maysan dhameystirin mashruuc dhismo oo u baahan qiimeynta deegaanka (Environmental Assessment, EA) ama bayaanka saameynta deegaanka (Environmental Impact Statement, EIS).

## VI. Ka qeybqaadashada Dadweynaha ee Loo dhanyahay

Wacyigelinta Bulshada waa sharuuda Title VI.  Helayaasha iyo helayaasha hoose waa inay raadiyaan oo tixgeliyaan aragtiyada dadka laga tiro badanyahay iyo dadyowga daqliga hoose iyadoo la sameynayo wacyigelinta dadweynaha. Helayaasha waxay haystaan xoriyada siday rabaan inay u go'aamiyaan tallaabooyinka gaarka ah ee aadka ugu haboon.  Waa inay gaaraan go'aamintaan sida ku saleysan ee ay ka koobantahay dadyowga ay saameysay, nidaamka ku luglahaanshaha dadweynaha, iyo illaha Hopelink.

Hopelink waxay ka qeybgelisay dadweynaha nidaamyadooda qorsheynta iyo go'aan gaarista, sidoo kale sida howlahooda suuq-geynta iyo wacyigelinta. Hopelink waxay sameeyeen Qorshaha Ka qeybqaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan, PPP), kaasoo tilmaamo yoolalka iyo ujeedooyinka ka qeybqaadashada dadweynaha (Fiiri Lifaaqa C).

Bisha Maarso 2024, waxaan ku dhafnay qorsheeyaha safarka cusub websaytkeena FindARide.org. Waxay diirada saartaa baahiyaha dhaqaaqa ee dadka waayeelka iyo dadka naafada ah ee dhammaan gobolada Pierce, King, iyo Snohomish. Qorsheeyaha safarka waa Wajiga 1 ee qorshaha wajiyada badan iyo hormarinteena Halka Wacitaan/Halka Taabashada. Hormarinta qorsheeyaha safarkeena waxaa lagu suurtogeliyay taageerada Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington (Washington State Department of Transportation), King County Metro, Sound Transit, Hopelink, iyo iskaashatada kale. Fikrad ka qaadashada aaladan waxay si toos ah uga timid qorsheynta loo dhanyahay.

Mobility Management Hopelink waxay martigelisaa kulamada isbaheysiga dhaqaaqa joogtada ah ee dhammaan King County, iyo in ka badan 100 ururo gaar ah oo ka qeybqaadanayo 2024. Waxaan sidoo kale sameynaa wacyigelinta bulshada ee goobaha jaalka, oo ay ku jiraan bandhigyada illaha, dhismooyinka guriyaha, maktabadaha, qeybaha cuntada, xarumaha caafimaadka, xarumaha waayeelka, iyo ururada adeega bulshada. Intaas waxaa dheer wacyigelinta qof ahaanta, waxaan sameynaa ka qeybgelinada fogaan aragga kala duwan, oo ay ku jiraan soo dhigida warbaahinta bulshada, websaydkeena, iyo wargeyska elektarooniga.

hopelink

## LIFAAQA A

## Ogaysiinta Dadweynaha ee Title VI ee Hopelink

*Title VI ee Xeerka Xaquuqaha Rayidka 1964 ayaa mamnuuco takoorida ku saleysan isirka, midibka iyo wadanka u dhalashada ee barnaamijyada iyo howlaha laga helayo caawinta dhaqaalaha Dawlada Dhexe. Hopelink waxaa ka go'an hubinta in qofna aan laga reebin ka qeybqaadashada, ama loo diidin faa'idooyinka adeegyadooda gaadiidka sida ku saleysan jinsiyada, midibka, ama asalka dhalashada, sida ku illaalsan Title VI ee Wareegtada Maamulka Gaadiidka Dawlada Dhexe (Federal Transit Administration, FTA) ee 4702.1.B*

*Haddii aad aaminsantahay in laguugula kacay takoorid sida waafaqsan Title VI, waxaad ku xareyn kartaa cabasho Xiriiriyaha Hopelink ee Title VI. Wixii warbixin dheeraad ah ee la xiriirto habraacyada cabashada Title VI iyo/ama macluumaadka la xiriirto waajibaadyadeena takoor la'aanta, fadlan kala soo xiriir Xiriiriyaha Hopelink ee Title VI (425) 869-6000 ama TitleVI@hopelink.org.*

*Ogeysiiskan waxaa lagu daabacaa goobahan:*

*Bellevue Center Lobby: 14812 Main St, Bellevue, WA 98007*

*Redmond Center Lobby: 8990 154th Ave NE, Redmond, WA 98052*

If information is needed in another language, contact (425) 869-6000.

Si necesita información en otro idioma, llame al (425) 869-6000.

如果需要其他語言的信息，請致電 (425) 869-6000.

Nếu cần thông tin bằng ngôn ngữ khác, liên hệ (425) 869-6000.

다른 언어로 정보가 필요하면 (425) 869-6000 으로 연락하십시오.

# LIFAAQA B

## Hopelink Title VI, ADA, iyo Foomka Cabashada Guud

hopelink Waxaan xareynayaa: ☐ Cabashada Title VI ☐ Cabashada ADA ☐ Cabashada Guud

| Qeybta I: | | |
|---|---|---|
| Magaca: | | |
| Ciwaanka Deegaanka: | | |
| Telefoonka: | Iimaylka: | |
| Sharuudaha Qaabka La heli karo? | ☐ Daabacaada Balaaran<br>☐ Cajalada la maqli karo | ☐ TDD<br>☐ Wax kale: |

| Qeybta II: |
|---|
| Ma waxaad ku xareyneysaa cabashadan naftaada? ☐ Haa ☐ Maya<br>*Haddii ay haa tahay, u gudub Qeybta III* |
| Haddii ay maya tahay, fadlan sii magaca iyo xiriirka qofka oo matalaadiisa aad ku xareyneysid: |
| Fadlan sharax sababta aad u xareysay dhinac sadexaad: |
| Miyaad ka heshay oggolaansho dhinac sadexaad si aad ugu xareysid adiga oo matalaya? ☐ Haa ☐ Maya |

| Qeybta III: TITLE VI KALIYA |
|---|
| Waxaan aamisannahay takoorida aan la kulmay inay ku saleysneyd (sax dhammaan inta ay quseyso)<br>☐ isirka ☐ Midabka ☐ Wadanka u Dhalashada |
| Taariikhda dhacdada: |
| Fadlan u sharax sida cad ee suurtogalka ah waxa dhacay iyo sababta aad u aaminsantahay in laguugu takooray. Sharax dhamaan dadka ku lug lahaa. Ku dar magaca iyo warbixinta xiriirka ee qofka (dadka) ku takooray (haddii aad garaneysid) sidoo kale sida magacyada iyo macluumaadka xiriirka marqaati walba (hadii la garanayo) |
| |
| |
| |
| |
| |
| |
| |
| |

| **Qeybta IV:** | **TITLE VI KALIYA** | | |
|---|---|---|---|
| Miyaad horay ugu xareysay cabasho ururkaan? | | ☐ Haa | ☐ Maya |

| **Qeybta V:** | **TITLE VI KALIYA** |
|---|---|
| Miyaad ku xareysay cabashadaan hay'ad walboo Dawlada Dhexe, Gobolka, ama hay'ada deegaanka, ama Maxkamad walboo Dawlada Dhexe ama Gobolka?<br>☐ Haa ☐ Maya | |
| Haddii ay haa tahay, fadlan sax dhamaan kuwa ku haboon<br>☐ Hay'ada Dawlada Dhexe:<br>☐ Maxkamada Dawalada Dhexe:<br>☐ Maxkamada Gobolka: | ☐ Hay'ada Gobolka: ________<br>☐ Hay'ada Sharciga: ________ |
| Fadlan sheeg warbixin xiriir oo hay'ada/maxkamada meesha cabashada laga xareeyay. | |
| Magaca: | Jagada: |
| Hay'ada: | |
| Ciwaanka Deegaanka: | |
| Telefoonka: | |

| **Qeybta VI:** | ***Waxaa loogu talagalay* Xeerka Muwaadiniinta ee Naafada ah (Americans with Disabilities Act, ADA) *ama Cabashooyinka Guud*** |
|---|---|
| Magaca qofka ama barnaamijka cabashadaan ka soo horjeedo: | |
| Cabashooyinka aan ahayn Title VI, fadlan isticmaal booska hoose si aad u sharaxdid arinta/waaya aragnimada: | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |
| | |

____________________ ____________________

Saxeexa Tariikhda

Fadlan iimayl ku soo dir *TitleVI@hopelink.org* ama boostada:

ATTN: Chief Operating Officer

Hopelink

PO Box 3577

Redmond, WA 98073-3577

# LIFAAQA C

## Qorshaha Ka qeybqaadashada Dadweynaha Hopelink

Qorshaha Ka qeybqaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan, PPP) waxay hiigsaneysaa in la sameeyo habraacyo ku dhiirogeliyo ka qeybqaadasho buuxdo oo dhammaan xubnaha bulshada ee aagga adeega Hopelink, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidneyn shaqsiyaadka daqligooda hooseeyo iyo kuwa laga tirada badan yahay, iyo kuwa leh aqoonta Ingiriiska xadidan.  Iyadoo dhaqanka loola jeedo ka codsashada ka qeybgalka dadweynaha waxaa laga yaabaa inaysan gaarin shaqsiyaad noocaas ah ama waxaa laga yaabaa inaysan u ogolaan wadooyin waxtar u leh tallada, ujeedada dadaalkaan ayaa ah qaadista tallaabooyin macquul ah inta lagu jiro nidaamka qorsheynta si loo siiyo fursadaha ka qeybqaadashada dadyowga taariiq ahaan aan matalaada laheyn.

Dhukumiintigaan wuxuu tilmaamayaa habraacyada lagu siinayo fursado dhammaan aaga muwaadaniinta si ay uga qeybqaataan hormarinta qorshooyinka muddada gaaban- iyo dheer ee adeegyada Hopelink. Meesha ku haboon, Hopelink waxay hagaajino ku sameyneysaa qorshaheeda ka qeybqaadashada dadweynaha.

Yoolalka iyo Ujeedooyinka Qorshaha Ka qeybqaadashada Dadweynaha

Yoolka PPP ayaa ah siinta fursado ka qeybgalka muwaadaniintoo dhan ee aaga adeega Hopelink si looga qeybqaato sameynta qorshooyinka muddada gaaban- iyo dheer. Ujeedooyinkeena waa:

- Go'aansashada waxa luuqadaha aan Ingiriiska aheyn iyo caqabadaha kale ee dhaqanka ka jiray ka qeybqaadashada dadweynaha ee aaga adeega Hopelink.
- Si loo bixiyo ogeysiinta guud ee kulamada, gaar ahaan kulamada tallada dadweynaha, oo qaab ay fahmi karaan dhammaan dadyowga aaga.
- Si loo qabto kulamada goobaha oo ay geli karaan iyo soo dhaweyn u leh dhammaan dagayaasha aaga, oo ay ku jiraan, laakin aan ku xadidneyn, xubnaha daqliga hooseeyo iyo laga tiro badanyahay ee dadweynaha.
- Si loo siiyo dariiqyo qulqulka macluumaadka oo labo wado ah iyo talada dadyowga laga yaabo inaysan ka qaybgalin kulamada.
- Si loo bixiyo qaabdhismeedka tallaabooyinka ku haboon noocyada kala duwan ee qorshooyinka iyo barnaamijyada, sidoo kale sida badelada ama wax ka beddelka qorsho ama barnaamij walboo noocaas ah.
- Si loo isticmaalo farsamooyinka muuqaaleynta sawirka ee lagu gudbinayo macluumaadka sida jaantusyada, garaafyada, sawirada, iyo khariiradaha.

Aqoonsashada Daneeyayaasha

Daneeyayaasha ayaa ah kuwa ay u saameysay, sida tooska ah ama aan tooska aheyn, ee qorshaha ama tallada qorshahaas. Kuwa laga yaabo inay si xun u saameysay, ama laga yaabo in loo diido faa'idada tallada (tallooyinka) qorshaha ayaa daneynayo aqoonsashada daneeyayaasha gaarka ah. Daneeyayaasha ayaa loo qeybiyaa dhoor kooxo: muwaadin guud, dadka laga tiro badanyahay iyo daqliga hoose, hay'adaha dadweynaha, iyo ururada iyo hay'adaha gaarka ah.

**Xubnaha Bulshada:** Si looga qeybgeliyo xubnaha bulshada, waxaan sameynaa wacyigelinta qof ahaanta ee boosaska isu imaanshaha dadweynaha, oo ay ku jiraan xarumaha waayeelka, xarumaha bulshada, xarumaha caafimaadka, maktabadaha, iyo dhismooyinka guriga. Websaydkeena ayaa sidoo kale lagu heli karaa todoba luuqadood. Shaqaalaha ayaa sidoo kale ku bixiyo sahanada luuqado badan, sameeyo kooxaha diirada, ka faa'ideysta warbaahinta jinsiyada, xarumaha warbaahinta deegaanka, iyo warbaahinta bulshada ee ku dhiirogeliso ka qeybqaadashada dadweynaha.

**Hay'adaha Dadweynaha:** Hay'adaha dadweynaha waxay siiyaan tallo qiimo leh nidaamka qorsheynta. Hay'adaha dadweynaha ee quseeyo waxaa ka mid ah macaamiishaas hoos yimaado dadyowga aan matalaada laheyn sida dadka laga tiro badanyahay, daqliga ku hooseeyo iyo qoysaska aqoonta Ingiriiska xadidan. Hay'adahaan oo dhan waxay hayaan aragti ku saabsan baahiyaha gaadiidka ee macaamiishooda oo waa jaalal wax ku ool ka ah ka adkaanshaha caqabadaha laga yaabo inaysan fahmin xirfadlayaasha sida tooska ah ula macaamilayo bixinta adeegyada.

**Ururada iyo Ganacsiyada Gaarka ah:** Hay'adaha iyo ganacsiyada gaarka ah waxay aragtiyo dhoor ah oo qiimo u leh nidaamyadeena qorsheynta. Waxaan xiriir balaaran la leenahay adeeg bixiyayaasha oo sida dhow ula shaqeeyo dadka naafada ah ama dadka waayeelka kuwaasoo badanaa u gudbo tirikoobka kuwa daqligooda hooseeyo, kuwa laga tiro badanyahay oo aqoonta Ingiriiska xadidan. Mid ka mid ah siyaabaha ugu guusha badan ee Hopelink si ay uga qeybqaataan ururada iyo ganacsiyada gaarka ah waxay aheyd dhinaca isbaheysigeena dhaqaaqa.

Intaas waxaa dheer nidaamyada lagu dajiyay xeerkaan, shaqaalaha waxay isticmaalayaan farsamooyinka xiggo inta lagu jiro daraasadaha qorsheyntooda iyo ka qeybgelinta daneeyayaasha sida ay u arkaan shaqaalaha inay ku haboontahay. Kuwaan waxaa ka mid ah:

- Bandhigyada xirfadlaha, muwaadinka, iyo ururada kale
- Maqaalada wargeysyada bulshada
- Wareysiyada saldhigyada raadiyowga deegaanka (labadaba ah dadka ku hadlo Ingiriis iyo Isbaanish)
- War saxaafadeed
- Boostiyada warbaahinta bulshada
- Wareysiyada shaqsiyaadka ah ama laga yaabo inay saameyso qorshooyinka la soo jeediyay
- Sahamada isticmaalaha iyo kuwa aan isticmaalin
- Kooxaha diirada iyo kulamada dhageysiga ee kooxaha bulshada ay saameysay
- Kulamada isbaheysiga dhaqaaqa
- Isticmaalka farsamooyinka muuqaalka sawirka ee gudbiyo warbixinta waxaa ku jiro laakin kuma

xadidna, jaantusyada, garaafyada, sawirada, khariiradaha.

Inta lagu jiro nidaam walboo qorsheyn ah, dadweynaha waxaa laga casuumay inay kala xiriiraan Hopelink Mobility Management faallooyinka oo ka codsadaan warbixin dheeraad ah. Codsiga waxaa lagu sameyn karaa dhinaca taleefonka iyadoo lagala xiriirayo Hopelink Mobility Management 425-943-6760 ama websaydkeena www.kcmobility.org.

Hopelink Mobility Management waxay kaashadeen in ka badan 150 ururo gaar ah ee 2023. Iyadoo loo marayo munaasabadaha wacyigelinta, waxaan ku xirnay 12,345 dad illaha gaadiidka ee ka caawiyo inay helaan adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan shaqada, caafimaadka, daryeelka carruurta, iyo madadaalada. Tusaalaha cida aan si joogta ah uga qeybgelineyno waxay ku taalaa hoos:

<u>Iskaashatada Mobility Management ee Hopelink</u>

Aging and Disability Services
Alliance of People with disAbilities
American Cancer Society
Asian Counselling and Referral Services
AtWork!
Auburn Senior Activity Center
Bellevue College
Bellevue Network on Aging
Bright Horizons Redmond
Byrd Barr Place
Capitol Hill Housing
CarePoint
Casa Latina
Catholic Community Services
Childhaven
Chinese Information and Service Center
City of Auburn
City of Bellevue
City of Bothell
City of Carnation
City of Duvall
City of Issaquah
City of Kent
City of Kirkland
City of North Bend
City of Redmond
City of Renton
City of Sammamish

City of Seattle
City of Shoreline
City of Snoqualmie
City of Tukwila
Coalition of Inclusive Emergency Planning (CIEP)
Community Health Plan of WA
Community Transit
Compass Housing Alliance
Domestic Abuse Women's Network
Department of Social and Health Services (DSHS)
Duwamish Family Safe Streets
Eastside Friends of Seniors
Eastside Legal Assistance Program
Eastside Neighbors Network
Encompass (Children's Services of Sno-Valley)
Fall City Community Association
Friends of Youth
Greater Redmond Transportation Management Association
Harborview Medical Center
HealthierHere
HealthPoint
HERO House
Hilltop House
Imagine Housing
Indian Association of Western Washington
International Community Health Services
International Drop In Center
International Rescue Committee
Issaquah/Sammamish Nourishing Networks
Issaquah Valley Senior Center
Jewish Family Service
Kaiser Permanente
King County Housing Authority
King County Library System
King County Metro
King County Office of Emergency Management
King County Sexual Assault Resource Center
Kirkland Senior Council
Lake City Community Center
Lake Forest Park Citizen's Commission
Lake Washington Technical College
Latino Community Fund

Literacy Source
Lake Washington Parent Teacher Student Association (LWPTSA) Council
Meridian Center for Health
Molina Healthcare
Mt. Si Senior Center
Muckleshoot Tribe
Multi-Service Center
MV Transit
National Alliance on Mental Illness (NAMI) – Eastside
Neighborhood House
North Seattle Community College
North Sound 211
North Urban Human Services Alliance (NUHSA)
Northshore Senior Center
Northwest Center
Northwest Healthcare Response Network
Old Friends Club
Open Doors for Multicultural Families
Park Place Assisted Living
Peter Kirk Community Center
Pierce County Community Connections
Pike Place Senior Center
Port of Seattle
Project Access Northwest
Proton Therapy Clinic
Public Health Seattle/King County
Puget Sound Educational Service District
Puget Sound Energy
Puget Sound Regional Council
Rainier Foothills Wellness Foundation
Rainier Valley Food Bank
Red Eagle Soaring
Redmond Community Court
Redmond Senior Center
Refugee NW
Refugee Resettlement Office
Renton Innovation Zone
ReWA
Riverview School District
Ronald Commons
SE Seattle Senior Center
SeaMar/Community Living Connections

Seattle Central College
Seattle Children's Hospital
Seattle Department of Neighborhoods
Waaxda Gaadiidka Seattle (Seattle Department of Transportation)
Waaxda Dabka Seattle (Seattle Fire Department)
Seattle Goodwill
Seattle Indian Health Board
Seattle Public Library
Senior Center of West Seattle
Sustainable Housing for Ageless Generations (SHAG)
Shoreline Community College
Shoreline/Lake Forest Park (LFP) Senior Center
Snoqualmie Tribe
Snoqualmie Valley Alliance Church
Snoqualmie Valley Chamber of Commerce
Snoqualmie Valley Community Network
Snoqualmie Valley Transportation
Snohomish County Transportation Coalition (SNOTRAC)
Sno-Valley Senior Center
Sophia Way
Solid Ground
Sound Cities Association
Sound Generations
Sound Transit
South Park Senior Center
Transportation Choices Coalition
U-District Food Bank
United Way of King County
University of Washington
Veterans Affairs (VA) Hospital
Valley Medical Center
Wallingford Community Senior Center
Washington State Department of Health
Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington (Washington State Dept of Transportation, WSDOT)
WorkSource
World Relief
Young Women's Christian Association (YWCA)

**LIFAAQA D**

**Kala Qeybinta Isirka ee Gudiga Hopelink**

Helayaasha leh guddiyada qorsheynta gaadiidka la xiriirto, aan la dooran, golayaasha ama guddiyada la talinta, ama guddiyada la midka ah waa inay bixiyaan jadwal muujinaya xubinimada guddiyadaas oo lagu kala soocay jinsiyada. Sharaxaada dadaalada loo sameeyay in lagu dhiirogeliyo ka qeybqaadashada dadka laga tiro badanyahay oo guddi noocaas ah waa in sidoo kale la bixiyaa. Jadwalka hoose wuxuu soo koobaa hal abuurka jinsiyada ee 20-ka xubin ee Guddiga Hopelink laga soo bilaabo Juun 2019.

**Kala Qeybinta isikada/Qowmiyada Gudiga Hopelink**

| Qeybta Jawaabta | Boqolayda |
|---|---|
| Iska Dhal | 67% |
| Madow ama Afrikaan Ameerikaan ah | 5% |
| Hindida Mareykanka iyo/ama U Dhashay Alaska | 0% |
| U Dhashay Aasiya | 24% |
| U Dhashay Hawaaa iyo Jasiirada Baasifiga ee kaloo | 0% |
| Isirada Kale | 0% |
| Labo isir ama Ka badan | 5% |
| Isbaanish ama Laatiino | 10% |
| Ma jiraan Jawaab la Bixiyay | 0.0% |
| **Wadarta** | **100%** |

Xubnaha guddiga imaan karo waxaa laga yaabaa inay ku taliyeen Maamulaha Guud (Chief Executive Officer, CEO) ama xubnaha kale ee Guddiga oo waxaa lagu codeeyaa aqlabiyada ugu badan ee ansixinta Gudiga. Waa yoolka Hopelink in la joogteeyo guddi loo dhanyahay oo kala duwan. Waxaa jiro xeer diyaarsan oo in Guddiga ka koobanyahay 1/3 wakiilada daqliga hoose, 1/3 wakiilada bulshada, iyo 1/3 saraakiisha la doortay.